# DENBI AAD GASHAA MA SOO DADAJINAYO DALKAAGI INAAD KU LAABATO EE WUU DAAHIN OO DIB AYUU U DHIGIN

Haddii aad Finland ka codsatay magangalyo qaxootinimo, balse aad doonayso inaad wadankaagi ku noqoto, safarkaaga adiga ayaa soo qorshaysan kara ama waxaad dalban kartaa inaad hesho caawimaada qofka iskiis doonaya inuu u laabto. Safarka aad wadankaagi ugu laabanaysaa wuxuu qaadan karaa wakhti dheer, sidaas aawadeed waa in aad dul-qaad yeelato. Sida ugu dhakhsaha badani waa haddi aad adigu safarkaaga soo qaban-qaabsato.

Waxaad xasuusnaataa denbi haddii aad gashaa ma dadajinayso noqoshadaada ee dib ayeey u dhigaysaa oo ku daahinaysaa. Haddii aad Finland dhexdeeda denbi ku samayso, ciqaabta lagugu xukumo waxaad ku qaadan oo ugu silci Finland dhexdeeda ka hor inta aaddan ku laaban oo ku noqon dalkaagi.

## Safarka oo aad iska usoo qaban-qaabsato

Safarka iskaa kalidaa waad usoo qaban-qaabsan kartaa, haddii aad u haysato lacag kugu filan tikidhada iibsashadooda. Xerada qaxootiga ama kaamku wax lacag ah kuma siin karo, kaamana caawin karo tikidka ama inaad hesho baasaboor.

**Haddii aad haysato baasaboor shaqaynaya oo aan dhacsanayn:**

1. Kansal oo ka noqo marka hore codsigaagi magangalyada:
   - Waad ka noqon kartaa codsigaagi ka hor inta aaddan dhoofin waa in aad tagto saldhiga booliska ama Xafiiska ajaanibta ee imagarayshanka waaxdiisa Helsinki.
   - Waxaad kaloo tagi kartaa haddii aad codsigaagi ka noqonayso oo aad ka kansali kartaa saldhiga ciidamada xuduudaha ilaaliya ee garoonka diyaarada ee Helsinki-Vantaa. Ugu talo wakhti fiican oo kugu filan baaritaanka marka aad xuduuda ka dhoofayso.
2. Soo iibso ama soo jaro tikid.
3. U sheeg inaad dhoofayso xerada ama kaamka qaxootiga ee aad ku nooshahay.

**Haddii baasaboorkaaga ay kaa hayaan masuuliyiinta dawladdu:**

1. Ka kansal oo ka noqo codsigaagi magan-galayada saldhigga booliska ama Xafiiska waaxda socdaalku ee imagarayshanka waaxda Helsinki, waxaadna isla markaas ka codsataa in ay baasaboorkaaga u diraan ayraboorka Helsinki-Vantaa. Ogoow diritaanka baasaboorku wuxuu qaadanayaa ugu yaraan 8 maalmood oo maalmo shaqo ah. Waxaad baasaboorkaaga helaysaa marka aad dhoofayso oo waxaa ku siinaya ciidamada xuduudaha ilaaliya.
2. Soo iibso ama soo jaro tikid.
3. U sheeg inaad dhoofayso xerada ama kaamka qaxootiga ee aad ku nooshahay.

**Haddii aaddan baasaboor haysan:**

1. Haddii aaddan haysan baasaboor, waa in aad safaaradda wadankaaga ka codsato warqad caddaynaysa inaad dalkaagi ku laabanayso. Waxaad ogaataa, haddii aad raadsato warqad caddayn ah oo aad wadankaagi ugu dhoofto ama baasaboor Helsinki ka doonato, in aan kaamka qaxootigu kuu soo qaban qaabin karin safarkaaga oo ku dhoofin karin ama ku dajin karin oo kuu rari karin Helsinki. Adiga ayeey khasab kugu tahay in aad horay u soo qaban-qaabsato hawlahaas oo dhan. Safaaraddaada waa in aad la xiriirto ka hor inta aaddan Helsinki ka dhoofin.
2. Kansal oo ka noqo marka hore codsigaagi magangalyada:

- Waad ka noqon kartaa codsigaagi ka hor inta aaddan dhoofin waa in aad tagto saldhiga booliska ama Xafiiska ajaanibta ee imagarayshanka waaxdiisa Helsinki.
- Waxaad kaloo tagi kartaa haddii aad codsigaagi ka noqonayso oo aad ka kansali kartaa saldhiga ciidamada xuduudaha ilaaliya ee garoonka diyaarada ee Helsinki-Vantaa. Ugu talo wakhti fiican oo kugu filan baaritaanka marka aad xuduuda ka dhoofayso.

3. Soo iibso ama soo jaro tikid.
4. U sheeg inaad dhoofayso xerada ama kaamka qaxootiga ee aad ku nooshahay.

**Haddii aad u baahan tahay waxaad codsan karaa taageerada la siiyo dadka ikhtiyaarkooda dalkoodi ugu laabanaya**

Hadii aysan suurtogal kuu ahayn in aad iska bixiso kharashka aad dalkaagi ugu noqonayso, waxaa lagu siin karaa taageerada la siiyo kuwa iyagu ikhtiyaarkooda u noqonaya. Dhoofka caynkaas ah wuxuu qaataa ugu yaraan todobaadyo badan.

**Samay oo yeel sidatan:**

- Dalbo ama ka codso kaamkaaga qaxootiga ama xerada aad ku jirto taageerada la siiyo kuwa iyagu ikhtiyaarkooda u laabanaya. Weydii oo su'aal faah-faahin dheeraad ah kaamka qaxootiga shaqaalihiisa. Waxaad sidoo kale faah-faahin dheeraad ka helaysaa oo ka akhrisan kartaa ciwaanka internetka ee www.migri.fi/paluu (Ingiriis www.migri.fi/return)
- Uga noqo oo u kansal si shakhsiyan ah codsigaagi magangalyo saldhigga booliska ama xafiiska Imagarayshanka waaxdiisa Helsinki. Ma helaysid lacagta taageerada ee lagu dhoofo, haddii codsi magangalyo ee qaxootinimo kuu xeraysan yahay oo dalabkaasi kuu maqan yahay.
- Haddii lagu siiyo taageerada lacagta ee dadka iyagu ikhtiyaarkooda u laabanaya, waxaa helaysaa caawimaad ku saabsan soo qaban-qaabinta safarka, baasaboorka helitaankiisa iyo sidoo kale tigid aad wadankaagi ku aadid. Arimahaas waxaa soo qorsheeya hay'adda caalamiga ah ee dadka guuraya saacida ee la yiraahdo IOM.
- Waxaana hawluhu dhakhso ugu dhammaadaan qofkii markaas haysta baasaboor shaqaynaya.